

**Xeer lamb. 195 ee 27 Luulyo 1963**  
**Dhismaha Hey'adda Qaranka Somaliyeed ee Wararka**

**MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA**

Kadib markii la arkay qod. 75 iyo 85 ee Dastuurka.

Kadib markii la arkay qod. 15 iyo 23 ee sharciga lamb 14 ee 3 Juun 1962 ee la xiriira hab dhismeedka Dowladda.

Kadib markii la garwaaqsaday baahidda loo qabo in la dhiso Hey'adda Qaranka Somaliyeed ee Wararka si loo qaabeyo la iskuna dubba rido adeegyada madbacadda iyo radiyaha si loo hormariyo madbaadda xorta ah.

Kadib markii la dhegeystay Golaha Wasiiradaha.

Kadib talo soo jeedinta Rai'sul Wasaaraha.

**WUXUU XEEREYAY**

**Qod. 1**

Laga bilaabo 1 Disember 1962 waxaa la dhisay, Wasaarada Warfaafinta, Hey'adda Qaranka ee Wararka (Somali National News Agency- SONNA), oo loo igmaday in ay ka haqabtirto adeega maalin laha ee wararka gudaha iyo kuwa dibedda ee la dabaaco, radiyaha iyo aalo kasto ee wargeys oo la isticmaalo.

**Qod. 2**

Hey'addu waxaa maamuli doono Maamule hoos tegi doono Madaxa Qeybta Wararka.

**Qod. 3**

Wargeysda Hey'addu waa saldhigga helista iyo qeybinta wararka soo gaara dalka ee hey'ad kasta ee dibedda ka soo laliso wararka.

Wargeysyada iyo qoraallada kale ama aala kasto oo lagu laliyo wararka waxay heli doonan wararka dibedda kadib markii ay iska qoraan adeega SONNA.

**Qod. 4**

Wasiirka Warfaafinta wuxuu awood u leeyahay kadib markii uu la tashay Wasiirka Maaliyahay in uu carifo ujuurada iyo qaabka lagu bixin doono maacaamilka adeega Hey'adda.

**Qod. 5**

Dekretada waxay hirgeli doonta maalinta ku xigta markii lagu soo daabacay Faafinta Rasmiga waxaana lagu keydin doona Keydka Rasmiga ee shuruucda iyo dekreetoyinka ee Jamhuuriyadda Somaliya.

Waxaa la farayaa in cid kasto ay u hoggansanato, una hoggamiso cid kasta Muqdisho, 27 Luulyo 1963.

**Aden Abdulle Osman**

Rai'sul Wasaaraha

**Abdirashid Cali Shermarke**

Wasiirka Warfaafinta

**Ali Mohamed Hirave**

Waa la arkay waana la diiwan geliyey- diwaan lamb1 bogga 119

Muqdisho, 11 Agoosto 1963

Xisaabiyaha Guud: **Dr. Ahmed Ali Omar**